

## Layli tababarka xaalad degdeg ah ee Jaamacadda Minnesota

**Arbacada, August 14, 2013**

### **Regis Center for Art (Riverside Ave. and 21<sup>st</sup> Ave. South)**

Jaamacada Minnesota ayaa ku qaban doonta Daanteeda galbeed(West Bank) layli ah tababar xaaladda degdegga ah oo billaaban doona 09:00ka subaxnimo Arbacada, August (bisha 8aad) 14da. Layligan waxaa lagu qaban doonaa dhismaha farshaxanka ee Regis Center, kuna yaala 405 iyo 418 21st Ave. S. Minneapolis.

Hadii aad aragto ama maqashid hawlgal booliis (ciidnka nabad sugidda)14-ka bisha, la soco MA jirto xaalad deg deg dhab ah oo taagan. Hawlgalkaasi waa layli lagu diyaarinayo saraakiisha ka shaqeeya amniga dadweynaha sidii ay wax uga qaban lahaayeen haddii ay xaalad degdeg dhab ah ooganto.

Dadka deggan xaafadda Daanta Galbeed (West Bank) iyo dadka soo booqdaba waa inay hawl-galkan dhici doona maalinta Arbacada, 08/14/2013 la socdaan:

- Gawaarida ciidanka nabad sugidda iyo kooxaha gurmada xaaladaha degdegga ah ayaa la dhigi doonaa qaybta gawaarida la dhigto ee jaamacadda oo u dhexeysa waddada Riverside Ave. iyo 21st Ave S. iyo nawaaxigooda.
- Waxaa kale oo aad maqli doontaan seerin dhawaaqa, ogeysiis iyo sanqadho kale oo la xidhiidha layliga socda.

Maalinta Arbacada, bisha Agosto (08), 14keeda ayaa waddooyinka halkan ku qoranayaa laga xidhi doonaa dad ku lugeeya iyo gawaari martaba:

- 21st Ave. S. From S. 4th St. to Riverside Ave.
- S.5th St. from 21st Ave. to 22nd Ave. S.
- University of Minnesota parkingkeeda 94 iyo 95 C.

Haya'daha ka qayb qaadan doona hawlgalkan waxaa kamid ah Booliiska Jaamacadda Minnesota, Idaaradda maareynta xaaladaha degdegga ah ee Jaamacadda Minnesota, Booliiska Minneapolis, Idaaradda dab-damiska Minneapolis, Idaaradda SWAT ee Minneapolis, Idaaradda ka shaqaysa hantida dadweyne ee Minneapolis, Baladiyada SWAT ee East Metro, Booliiska ilaaliya gaadiidka dadweynaha, Xafiiska Sheriff ee Degmeada Hennepin, Isbitaalka Hennepin County Medical Center iyo FBI-da.

Layligan ayaa haya'do badan ka caawin doona inay tijaabiyaan sida ay isula shaqayn karaan si ay usii wadaan heeganka ay ugu jiraan wax ka qabadka goortii ay xaalado waaweyn oo degdeg ah dhacaan.

**Waxii warbixin dheeri ah, fadlan kal xiriir booliiska khatika taleefanka xaalada aan deg degga ahayn ee 612-624-COPS (2667)**